

PROPYLESS

Propylene glycol

PROPYLESS®

Boomaato ama labeen si fudud loo dhuuqo, haragga jilcisa oo basaas tire ah dhawrisna leh

Harag engegsan oo cuncun leh? Si uu haraggu ugu sugnaado jileec iyo dabacsanaan waxuu u baahan yahay in ay ku jirto qiyaas biyo iyo saliid ah. Walxahani waxay xoojiyaan oo ay dib u hagaajiyaan car-qaladda haragga ee xumaatay si uusan haraggu u yeelanin engeg, adayg iyo jajab. Haragga engegsan waxuu si fudud u yeelan karaa cuncun oo daciif ayuu noqon karaa, taasoo keeni karta dareenka cuncunka iyo cambaar. Dhibaatadu waxay ugu xun tahay xilliga dayrka iyo jiilaalka.

Haragga engegsan biyo gelisa oo dhawrta

Boomaatada Propyless waa labeen harag oo si fudud loo marsado oo jirkoo dhan loogu talagalay oo aanan keeni dufan ama gubasho. Waxaa ku jira curiyaha firfircoon ee la yiraahdo propylene glycol, kaasoo biyaha isku xira oo haragga u suurto geliya in uu si ka fudud qoayaanka u xajisto. Boomaatada Propyless waxaa weliba ku jirta saliid (9%) si loo hubin karo in uu haraggu mar kale yeesho jileec iyo dabacsanaan. Saliiddu waxay weliba muhiim u tahay dhawrista haragga. Maxaa dheer, Propyless waxay leedahay natiijo jeermis celin ah oo lagaga hortago qaar ka mid ah baktiiriyada iyo boqoshaada.

Yaa Propyless isticmaali kara?

Muhiim ma aha haddii haraggaagu yara engegsan yahay ama engeg badan yahay, ama haddii ay meelo yar yar ama balballaaran haraggaaga ka engegsan yihiin. Boomaatada Propyless waxaa lagu daaweeyaa noocyo farabadan oo kaladuwan oo ah haragga engegsan, tusaale ahaan wajiga dushiisa ama qarka sare, ama xataa lafta madaxa. Boomaatada Propyless waxay weliba ugu fiican tahay in loo isticmaalo labeen gacanta la mariyo ama ka dib marka timaha la iska xiiro, ragga iyo dumarkaba, maadaama ay leedahay natiijo jeermis celin ah. Waxay weliba aad ugu fiican tahay in siyaado loogu daaweeyo haragga engegsan ee cuncunka leh ee badi ka yimaadda daawaynta finanka ee daawooyinka loo adeegsado. Boomaatada Propyless waxaa loo ansixiyey da' walba (laga bilaabo 0 sano) Labeenta haragga ee qooskoo dhan!

Sida loo isticmaalo boomaatada ama labeenta Propyless

Labeenta marso marka aad u baahato, ama labo jeer ama in ka badan maalintii, iyo weliba ka dib marka ay biyo ku taabtaan.

Fikrad! Boomaatada Propyless ku hayso qaboojiyaha si aad u xoojiso natiijadeeda cuncun celinta iyo qaboojinta.

Natiijada ama saamaynta la caddeeyey ee haragga engegsan iyo cambaar



Propyless (Propylene glycol): ATC kood D02AX. Mariska jilcinta leh ee lagu daaweeyo noocyo kaladuwan oo ah haragga engegsan. Boomaatada Propyless waa daawo la ansixiyey oo uu takhtar qori karo ama rijeeto la'aan aad kaga iibsan karto farmashiida kuugu dhow. Si taxaddar leh u akhriso buugyaraha ku jira baakadka. Xiriirka: Trimb Healthcare, Ostermalmsgatan 19, 114 26 Stockholm, +46 (0)8 - 12 13 52 00, info@trimb.se

TRIMB
Healthcare